MALMÖ UNIVERSITET

# Falalka rabshada iyo xad gudubka inta lagu jiro qaangaarnimada - daraasada qilaafaadka carruurta iyo qaangaarka ee waaladiintooda

*Waxaan jeclaan laheyn inaan ku casuuno canugaaga inuu ka qeybqaato daraasada cilmiyeed.*

Waxaad u heleysaa warqadaan sababtoo ah waxaa tahay masuulka canuga 8 sanno jirka ah, iyo sababtoo ah kooxda maamulaha/maareynta dugsiga canugaaga ayaa ku dhawaaqay in dugsiga uu rabo inuu ka qeybqaato daraasada. Waxaan jeclaan laheyn ogolaanshahaaga lagu casuumayo canugaaga inuu ka qeybqaato daraasada.

Daraasada waxaa sameynayo cilmi baarayaasha Jaamacada Malmö oo waxaa lagu hirgelinayaa qiyaastii 40 dugsiyo sare iyo dugsiyada sare ee kore ee Skåne inta lagu jiro simistarka gu’ga ee 2022. Guud ahaan, waxaan qiyaaseynaa in wax ka badan 6,000 carruur iyo qaangaaro ay ka qeybqaadanayaan daraasada.

*Maxay ku saabsantahay daraasada?*

Qilaafaadka u dhaxeeyo carruurta iyo waaladiinta waa caadi sababtoo ah inta lagu jiro qaangaarada. Daraasadaan waa noocyo kala duwan ee rabshada iyo falalka xadgudubka ee carruurta iyo qaangaarka ay ku soo rogi karaan waaladiintooda, iyo sida midaan loo sharaxi karo. Caalami ahaa, waxaa jiro cilmi baaris aad u yar ee falalka noocaan ah ee carruurta iyo qaangaarada ee ku aadan waaladiintooda. Kani waa daraasada ugu horeyso ee gobolka Nordic ee diirada saarayo arintaan.

Daraasada ayaa ujeedkeeda ah inay baaraan sida caadiga ah ay u tahay carruurta iyo qaangaarada ee u dhaxeeyo da’aha 14 iyo 19 ay ugu keenaa waaladiintooda noocyo kala duwan oo rabshad iyo falalka xadgudubka: xadgudubka hadalka ah, rabshada jireed, xatooyada iyo burburinta. Waxaan rabnaa inaan ogaano haddii dabeecad noocaas ah ay ku kala duwantahay da'aha kala duwan iyo u dhaxeyso kooxyada bulshada kala duwan ee dadweynaha ku jiro. Waxaan sidoo kale rabnaa inaan baarno xaqiiqaha gaarka ah iyo qoyska la xiriiro ee laga yaabo inay sharaxdo dabeecad noocaas ah. Si markaas loo baaro midaan, waa muhiim in la gaaro koox balaaran oo carruur iyo qaangaar ah, oo ay ku jiraan kuwa la kulmay dabeecada aan xiiseyneyno iyo kuwa aan la kulmin dabeecad noocaas ah. Daraasada waxaa lagu hirgelinayaa dugsiyada qiyaastii toban degmooyinka Scanian oo waxaa loogu tallogalay dhalinyarada fasalada 8 iyo 9 ee dugsiga qaranka iyo fasalada 1, 2 iyo 3 ee dugsiga sare ee kore.

*Maxay ka qeybqaadashada daraasadaan ula micna tahay canugaaga?*

Canugaaga ayaa ka jawaabayo foomka su’aalaha dugsiga. Foomka su’aalaha waxaa lagu buuxiyo dhijitaal ahaan (ee kumbuyuutarka) oo wuxuu wataa su’aalo badan. Kuwaan waxaa ku jiro sifooyinka gaarka ah, xiriirada barbaarinta iyo qoyska, taariiqda bulshada, dugsiga iyo waqtiga firaaqada, iyo la kulmida noocyada kala duwan ee rabshada iyo dabeecada dhaqan jabinta eeku aadan waaladiinta.

**Foomka su’aalaha waxaa looga jawaabayaa si magac la’aan ah. Tan waxaa loola jeedaa inaanan garaneynin cida ka soo jawaabtay sahamada - ma jiraan sharaxaadaha gelitaanka ama furayaasha waa loo baahanyahay, oo ma diiwaangelino ciwaanada IP. Ma jiraan carruur kale, waaladiin ama macalimiin oo laga yaabo inay kja qeybqaataan qeyb jawaabaha canugaaga.**

*Sidee ayaa looga baaran dagaa warbixinta canugaaga?*

Warbixinta aan ku helnay daraasadaan waxaa lagu keydinayaa goobta xogta ee lagu keydiyay kumbuyuutar qarsoodi ah ee Jaamacada Malmö. Warbixinta la aruuriyay waxaa laga yaabaa in loo adeegsado kaliya daraasada iyo qaab adiga iyo canugaaga aad ansixiseen. Goobta xogta waxaa la keydinayaan toban sanno kadib markii mashruuca dhammaado, oo kadib la tirayaa.

*Waxaan u baahannahay ogolaanshahaaga loogu casuumo canugaaga inuu ka qeybqaato*

Haddii ay jirto daraasadaha ku lugleh carruurta aan weli gaarin da’da 15, anisixinta labada carruurba iyo masuulkooda waa loo baahanyahay; tusaale ahaan, ogolaanshaha la ogeysiiyay. Warqadaan waxay kuu tahay codsi, sida masuul, lagu ogolaado in canugaaga laga casuumo inuu ka qeybqaato daraasada. Waxaa jiro warbixin dhammaadka warqada ah oo sida loo aqbalo ka qeybqaadashada canugaaga. Haddii aad dooratid inaadan ka jawaabin, waxaa loo fasirayaa sida ogolaanshaha. Tan waxaa loo yaqaan ogolaanshaha dadban.

Waxaan u baahannahay ogolaansho firfircoon ee carruurta ah. Tan waxaa loola jeedaa in ka qeybqaadashadooda daraasada inay gabi ahaanba iqtiyaar tahay. Ka hor inta carruurta aysan buuxin foomka su’aalaha, waxaan ogeysiineynaa iyaga wax ku saabsan daraasada iyo ujeedooyinkooda, in ka qeybqaadashadooda ay iqtiyaar tahay, iyo in ay joojin karaan buuxinta foomka su’aalaha waqti walba, haddii ay sidaas rabaan.

*Sidee ayaa natiijooyinka loo soo sheegayaa?*

Natiijooyinka daraasada waxaa lagu daabacayaa joornaalada sayniska, inta badan af Ingiriis, iyo qoraalada sayniska caanka ah ee Swedish. Natiijooyinka waxaa lagu soo sheegayaa kaliya qaabka tirikoobyada heerka kooxda. Tan kuma ahan halis shaqsiyaadka la aqoonsaday.

*Waa maxay faa’idooyinka ka qeybqaadashada?*

Ka qeybqaadashada daraasada, canugaaga wuxuu nagu caawinayaa inaan helno cilmi cusub ee ku saabsan rabshada iyo dabeecada dhaqan jabinta ee ka dhaxdaa qoysas badan ee Sweden. Dabeecada rabshada ee ku aadan waaladiinta waxay la xiriiri kartaa murugo, dambiile, ceeb iyo cawaaqiibaha kale ee xun, oo labadaba waaladiinta iyo carruurta. Cilmi aan ka helno daraasada waxay na bari kartaa sida loo naqshadeeyo tallaabooyinka ka hortaga iyo taageerada ee qoysaska ay saameysay.

*Miyay jiraan wax qasaarooyin ee ka qeybqaadashada ah?*

Su'aalaha aan ku weydiino sahanka waxaa u adeegsaday daraasado badan oo dhalinyarada ah cilmi baarayaal kale, iyada oo aan jirin wax dhibaatooyin ah oo fasaxidooda. Waxaan sidoo kale sameynay daraasad tijaabo ah ee aan ku tijaabinay sahanka kaliya in ka badan 350 arday. Dabcan, si dhameystiran looma xukumi karo in su'aalaha qaar ay keeni karaan afkaaro ama dareemo carruurta qaar ku jiro. Haddii canugaaga u maleeyo in qaar ka mid ah su'aalaha ku jiro foomka su'aalaha ay aad xasaasi u yihiin ama u adagyihiin, isaga/iyada ayaa ka hari karo ka jawaabidooda.

*Maareeyaha daraasada*

Daraasada waxaa sameynayo cilmi baarayaasha Jaamacada Malmö, oo waxaa na maalgelinaya FORTE, Gollaha Cilmi baarista Swedish ee Caafimaadka, Nolosha Shaqada iyo Daryeelka. Maareeyaha mashruuca waa Björn Johnson (borofeesarka Waaxda Shaqada Bulshada). Lisa Andersson (cilmi baaraha Waaxda Shaqada Bulshada) iyo Robert Svensson (borofeesarka Waaxda Dambiga) ayaa sidoo kale ka qeybqaadanayo mashruuca.

*Maku casuumi karnaa canugaaga inuu ka qeybqaato daraasada?*

Haddii aad u ogolaatid in canugaaga laga casuumo inuu ka qeybqaato daraasada, uma baahnid inaad wax sameysid. Haddii AADAN u ogolaan in canugaaga laga casuumo, fadlan nagu soo ogeysii i-meel (respons@mau.se), teleefon (040-665 76 90) ama SMS (070-4383973). Geli magaca koowaad iyo dambe ee canuga iyo dugsigee ayuu caNUga ka qeybgalaa.

Haddii aad jeclaan laheyd warbixin badan ee ku saabsan daraasada, waxaad la xiriiri kartaa Björn Johnson, midkood i-meel ahaan (bjorn.johnson@mau.se) ama taleefon ahaan (040-6657690).